

Khidmadaha Dugsiga Su'aalaha Waalidka (FAQS)

Su'aalaha Badanaa Leys Weydiyo

Gudiga Waxbarashada Gobolka Utah (Utah State Board of Education) (USBE) wuxuu rabaa in uu hubsado in ardayga KASTA uu geli karo dhamaan fasalka iyo hawlahaa iyadoo aan la fiirin daruufaha maaliyadda uu qoyska ku sugar yahay. USBE waxay awood sharci leedahay in ay abuurto sharciyada loo baahan yahay in dugsiyada raacaan marka ay lacagta ka soo aruuriyaan ardayda iyo waalidiinta si ay u hubsadaan in qof kasta uu geli karo.

Maxay Tahay Khidmadda Dugsiga?

Khidmadda waxaa lagu sifeyaa sida shay lagu qiimeeyo lacag \$\$ kaasoo uu soo codsado ama uu doono dugsiga si ardayga u yeesho awood uu uga qeybgalo hawsha, fasalka, ama brograamka. Tan waxaa laga garan karaa cadaadis ama codsi in laga qeybgalo sida qeyb ka tirsan kooxda. Tan macnaheeda waxay tahay in haddii uu jiro shay aan loo baahneyn si looga qeybgalo, balse weli la filaayo in ardayga uu haysto shayaas, waxay noqon doontaa khidmadda dugsiga. Lacagaha laga bixiyo dhinacyada saddaxaad sida khidmadaha gelitaanka ama kirada qalabka waxay sidoo kale ahaan karaan khidmado.

Tusaalooyin:



\$10 oo loogu talogalay
fasalka Fanka



\$70 oo loogu talogalay
Kooxda Dabaasha



\$5 oo loogu talogalay
Muraayadaha Ammaanka



\$30 oo loogu talogalay
Tigidhka Prom




\$150 oo loogu talogalay
Klinikada Isboortiga
Kuleylaha



\$20 oo loogu talogalay goynta
ama dabeecad xumada



\$300 oo loogu talogalay
safarka Heesaha ee dibadda
ka ah gobolka, iyo cuntada



\$30/bil kasta oo loogu
talogalay brograamka
dugsiga-kaddib

Sideey waalidiinta ku ogaadaan khidmadaha ka jira dugsigooda?

Dugsi kasta waxaa laga rabaa in uu dhamaan khidmadaha ku qoro **Jadwalka khidmadda**, haddii kale looma ogola in ay soo dallacaan khidmadda.

Jadwalka khidmadda waa in sidoo kale la siiyo waalidiinta iyo ardayda inta ay socoto diiwaan gelinta lana soo geliyo bogga internetka dadweynaha ee dugsi kasta.

Dugsiyada Hoose: Wax kharash ah lama dalaci karo marka laga reebo barnaamijka dugsiga ka hor ama dugsiga kadib.

Ka-Dhaafidda Khidmadda waxaa heli kara: Ardayda dakhliga qoyskooda kooban yahay, waxay dalban karaan in laga dhafo qaar ama dhamaan khidmadahaan.

Dugsiga ma reeban karaa ama miyuu ardayga ka saari karaa hawsha, fasalka ama brograamka uu mas'uulka ka yahay dugsiga?

-----> Maya <-----

Dugsiga ma diidi karo in uu bixiyo darajada koorsada ama ma reeban karo diiwaanka rasmiga ee ardayga sida jadwalada fasalka maxaa yeelay ardayga ma bixinin khidmadda.

Dugsiga wuxuu iskudayi karaa in uu soo aruuriyo khidmadaha ardayga haddii ardayga uusan dalbanin ka-dhaafidda khidmadda ama arjigooda la soo diido balse lama ogola in ay saameyso ka-qeybgalka ardayga inta lagu dhex jiro maalin dugsiyeedka taasoo ugu wacan khidmadaha aan la bixinin.



Utah State
Board of
Education

School
Fees

Revised July 2024
ADA Compliant

Maxaa Loola Jeedaa Ka-Dhaafidda Khidmadda?

Ka-dhaafidda khidmadda waa marka qofka laga dhaafio bixinta khidmadda. Tan macnaheeda waxay tahay in ardayda xaqa u yeelata ka-dhaafidda khidmadda ka qeybgeli karaan fasal kasta ama hawl kasta oo ka jirta dugsiga iyadoo aan waxba lagu soo dallicin.

Tusaale:



Marka ardayga dugsiga ka qeybgalo kooxda kubadda cagta kaddibna qeyb ka mid ah kooxda codsadaan in xubin kasta oo ka tirsan kooxda qaadato labbis aan loo baahneyn in loo qaato cayaarta. Bacdamaa ka-qeybgale kasta laga filaayo in uu soo qaato labbis gaar ah (wuxuu ahaan karaa shaarka gacma gaabka, daboolka madaxa, kabo, iwm), iminka waa in khidmadda labbiskaas laga dhaafio kuwa xaqa u yeesha maxaa yeelay waa la codsaday ama waa loo baahnaa si looga qeybgalo taasoo qeyb ka ah kooxda.

Sidee loola kulmaa Xuquuqda Madaniga baahida luqadda ay qabaan waalidiinta?

1

Haddii ardayda dugsiga ama waalidka ee ku hadla luqad keliya oo qoran ay dhaafaan 20%, LEA waa inay sidoo kale daabacdaa jadwalka kharashka iyo siyaasadaha dhaafitaanka khidmadda luqadda qoysaskaas.

2

Haddii dugsiga uusan ogeysiiska ku soo daabicin luqadda aasaasiga qoyska, markaa dugsiga waxaa laga rabaa in uu qof ahaan ula kulmo qoyska, kaashado turjubaan, si qoyska uu si buuxdo ula socdo dhamaan sharchiyada u dagsan ee ku saabsan khidmadaha dugsiga iyo in ay fahamsan yahiin xuquuqda ay leeyahiin ee ku saabsan ka-dhaafidda.

Sidee ayuu qoyska ardayga ku dalbadaa ka-dhaafidda Khidmadda?

1. Dugsiga waa in uu arjiga siiyo qoyska ardayga waqtiga diiwaangelinta lana heli karo waqtii kasta oo loo baahan yahay bixinta khidmadda dugsiga si ay uga qeybgalaan hawsha ama brograamka.
2. Habka loo dalbado ka-dhaafidda khidmadda waa in ay ahaato mid **asturan**. Kuwa ku lugta leh keliya hawsha ka-dhaafidda khidmadda keliya ayaa loo ogol yahay in ay ogaadaan qofka loo ogolaaday ka-dhaafidda khidmadda.
3. Habka lagu helo ka-dhaafidda khidmadda waa in ay ahaato mid xaq ah, loo jeedo, leyskana ilaaliyo qajilaad, soo dhaweysi aan munaasab ahayn, lana saarin ardayga ama waalidka culeys aan macquul ahayn.
4. Arday kasta oo ku sugaran ka-dhaafidda khidmadda waa in aan loola dhaqmin si ka duwan ardayda kale.

USBE waxay dajisay sharchiyadaan si loo hubsado in arday kasta uu geli karo dhamaan fasalada iyo hawlaha ka socda dugsiga.

Tusaale:

Kooxda fanka waxay fursad u haysataa in ay ka qeybgasho tartanka qaranka ee lagu qabto California halkaas ay inta badan kooxda jeebkeeda ka bixiso safarka. Ma loo ogolaan karaa xubinta kooxda ee qaadata ka-dhaafidda khidmadda in ay tagto haddii safarka yahay mid uu qofka iskiisa uga qeybgalo kana tirsaneyn qeyb ka mid ah darajada?

HAA

Ka dhaafida ujrada waxay khusaysaa koorsada, barnaamij kasta, ama waxqabad kasta oo ay kafaalo qaadaan ama ay taageeraan ama iyada oo loo marayo dugsiyada dadweynaha. Safarka noocaan ah wuxuu ku xiran yahay ka dhaafid ujro.



Ka-Dhaafidda Khidmadaha - Sii socoto

Maxaa dhalliya in ardayga uu xaq u yeesho ka-dhaafidda khidmadda?

- 1** Marka dakhliga qoyska waafaqo heerarka Maamulaha Gobolka dajiyay. Heerarkaan waxaa loo sameyay in la waafajiyo heerarka dakhliga la xariira brograamka qadada lacag la'aanta ee federaalka. Tan macnaheeda waxay tahay in haddii ardayga xaq u yeesho qadada lacag la'anta, waxay xaq u yeelan doonaan ka-dhaafidda khidmadda. Qoysaska waxaa laga codsan karaa in ay soo gudbiyaan macluumaad dheeraad ah si loo xaqijiyo dakhligooda marka ay dalbadaan ka-dhaafidda khidmada.
- 2** Ardayda hela dakhliga soshal sekuritiga ee naafada u qalma. Dugsigu waxa laga yaabaa inuu aqbalo dukumeentiga caddaynta manfaca ee Maamulka Sooshal Sekuritiga beddelka caddaynta dakhliga.
- 3** Marka ardayda ama qoysaska qaataan Kaalmada Ku Meelgaarka ee la Siiyo Qoysaska u Baahan (Temporary Assistance for Needy Families) (TANF), qeyb ka tirsan Brograamka Shaqada Qoyska Gobolka (State's Family Employment Program) (FEP), ama Barnaamijka Caawinta Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP). Xaqijinta go'aanka Waaxda Adeegyada Shaqaalaha ee Utah (Utah Department of Workforce Services) ee ku beegan muddada la soo codsaday ka-dhaafidda khidmadda waxaa loo tixgelin karaa sida xaqijin kale.
- 4** Marka ardayda ku jiraan xabsiga gobolka ama daryeelka korinta. Foomka qabashada daryeelka dhallin yarka iyo warqadda diiwaan gelinta dugsiga uu bixiyo qofka ka shaqeeyo kiiska kana socda Qeypta Adeegyada Qoyska iyo Cunugga ee Utah (Utah Division of Child and Family Services) ama Waaxda Caddaaladda Dhallinta Utah (Utah Juvenile Justice Department) waxaa loo gudbin karaa dugsiga baddalkii xaqijinta dakhliga.
- 5** Ardayda ay degmada ku qoray McKinney-Vento ee degmada ama Xiriiryaha dugsiyada gaarka ee McKinney-Vento. Ardayda uu ku qoro xiriiryaha waxaa loo adeegsanaya in lagu xaqijiyo oo kaliya ardayda ka soo baxda shruuudaha ku xiran.
- 6** Waxaa kaloo dhici karta in dugsiga uu ardayga bixiyo ka-dhaafidda khidmadda, taasoo ku saleysan hadba sida kiiska yahay, marka ardayga uusan xaq u yeelanin sida hoos timaado xaaladahaan balse aan awood u lahayn in uu bixiyo khidmadda. Dugsi kasta waxaa laga rabaa in uu tixgeliyo daruufaha arday kasta iyo in ay bixiyo siyaabo uu arday kasta si buuxdo uga qeybgalo siistemka waxbarashada dadweynaha ee Utah iyadoo aan la fiirinin daruufaha maaliyadda.

Maxaa dhaca marka dugsiga diido ka-dhaafidda khidmadda ardayga?



Haddii dugsiga uu ardayga u diido ka-dhaafidda khidmadda maxaa yeelay lama kulmin shardiga loo baahan yahay, ardayga wuxuu racfaan u soo gudbin karaa dugsiga soona codsado in macluumaada la fiiriyo lana tixgeliyo taasoo ku saleysan xaaladda.

Inta waqtigaan lagu dhex jiro, dugsiga waa in uu joojiyo dhamaan khidmadaha ilaa laga gaaro go'aanka kama dambaysta.

Waalidiinta waa in la siiyo fursado dheeraad ah oo aan ahayn ka-dhaafidda khidmadda si haddii cunugooda loo diido ka-dhaafidda khidmadda, waxay qabaan siyaabo kale ay ku hubsadaan in ay si buuxdo uga qeybgalaan fasalada iyo hawlaha dugsiga.

Sidee Ayay Waalidiinta Uga Qeybgeli Karaan?

Dugsiyada waxa looga baahan yahay inay yeeshaan laba kulan oo dadwayne, kaas oo waalidka lagu wargelinayo, laguna dhiirigelinayo inay ka soo qayb galaan ka hor inta aan la ansixin kharashka sanadka. Kulamadan dadwayne waxay siinayaan fursad waalidiinta inay ka qayb qaataan oo ay ra'yigooda ka dhiibtaan khidmadaha laga qaado dugsigooda.

Waa in la soo ogolaado jadwalada khidmadda iyo siyaasadaha ugu dambayn Abril 1 sannadka lagu dabaqo khidmadaha ka hor.

USBE waxay ku tallineysaa in waalidiinta isha ku hayaan ogeysiisada shirarkaan ee ka yimaada dugsigooda ka hor inta aan la gaarin Abril 1, si ay uga qeybgalaan.



Macluumaad Badan, Su'aalaha, ama arrimaha

Nagala soo xariirt: schoolfees@schools.utah.gov ama
booqo: <https://schools.utah.gov/schoolfees>